



Waxbarasho Wadajir ah Tallaabo kasta oo la qaado

MAGAALADA TORONTO | KOOXDA ADEEGGA CARRUUNIMADA HORE: COMMUNITY LIVING TORONTO | XARUNTA
MEESHA SURREY (SURREY PLACE CENTRE)

XAANSHI TILMAAN-BIXINEED

Hannaanka Dushoo Rogan looga Soo Gashado Jaakadda

Carruur fara badan ayaa u baahan taageero markay baranayaan xirfado cusub. In loo kala qaado xirfad tallaabootayn aad u yarna waxay ilmaha ka caawin kartaa inuu barto halkii marba hal tallaabo. Tiro ahaan inta tallaabo oo xirfad ama hawl loo kala qaadayana waxay ku xiran tahay baahida ilmahaaga.

Waxaa suurtagal ah inaad siiso ilmahaaga nidaam muuqaal ah oo kala horreeya. Taasina asal ahaan waxa weeye sawirro taxane ah oo ku tusinaaya tallaabootinka lagama maarmaanka u ah in la dhammasystiro hawl. Wuxaanad isticmaali kartaa sawirro dhab ah, sawirro xarriijin ah, ama astaamo

sawirro ah. Marka aad isticmaalayso nidaam muuqaal ah oo kala horreeya, ku dheji meel la siman aragtida indhaha ilmahaaga, fartana ku fiiq sawirka, oo akhri tallaabada ka hor intaadan dhammaystirin hawsha.

Arrintani waa mid xiiso u leh carruurta oo ay ku baranayaan siday u xirtaan jaakaddooda. Raac keliya tallaabootinka hoos ku qoran. Haddii aanu ilmahaagu awoodi karin inuu foorarsado ama ku fariisto sagxadda dhulka, wuxaad jaakadda u dul saari kartaa miis gaaban ka hor intaadan hawsha nidaamkan wax kala horreysinta aadan gelin.

1. Dul dhig jaakadda sagxadda dhulka ama miis adigoo fidinaya madax-gashiga iyo gacmaha jaakadda. Haddii jaakaddu ayna lahayn madax-gashina, hubi astaanta warshaddii jaakadda samaysay ay ku soo dhejisay inay hagaag u muuqato. Haddii astaantu tahay mid yar ama aan hagaag loo arki karin Wuxaan ku dul dhejin kartaa astaanta warqad koolo leh midabbo badan oo qurxoonna leh.



Hannaanka Dushoo Rogan Looga Gashado Jaakadda, waa socotaa

2. Wuxuu cunuggu istaagayaa madax-gashiga ama astaanta gadaashooda.



3. Wuxuu cunuggu gacantiisa dhexgalinaya jaakadda gacmaheeda. Waanad ka caawin kartaa inuu toosiyo gacmaha jaakadda.



Hannaanka Dushoo Rogan Looga Gashado Jaakadda, waa socotaa

4. Rogid! Si toosan ayuu cunuggu u soo saarayaa gacmihiisa.



5. Dhanka kale u rogid! Asagoo madaxiisa ka dul lalinaya, ayuu cunuggu sare u qaadayaa gacmihiisa.



Hannaanka Dushoo Rogan Looga Gashado Jaakadda, waa socotaa

6. Dul ka Xirasho! Dib ayuu cunuggu gacmihiisa u soo celinaya waanu gashaday jaakadda! Waanad ka caawin kartaa cunugga inuu hoos u jiido jaakadda.



Tallaabada ugu horreysa ayaa ah furaha hayaag loogu gashanayo jaakadda. Markuu cunuggaagu aanu ku dhibaato qabin tallaaboo yinka loo marayo xirashada jaakadda, waxaad tusin kartaa siduu asagu iskiis u gashan lahaa jaakaddiisa.